
# Iskaashiga Waxabrashada loo wada dhan yahay ee Ururada dadka Naafada ah

Xirmo

2




## Buugga Ka-qayb-galayaashada


Waxaa loo diyaariyey:

Puntland Disability Organizations Network (PDON), Somalia
Disability Aid Foundation (DAF), Somalia
Adventist Development and Relief Agency (ADRA), Somalia
Save the Children, Somalia
Norwegian Association of Disabled

Waxaa diyaarisay:

Enabling Education Network, October 2021

Disability Aid Foundation · ADRA · Save the Children · Inclusive Learning Approach · NAD – The Norwegian Association of Disabled · EENET

[Sharaxaada sawirka: (bogga hore): Shan qof oo isugu yimid geed hoostiis, afar kuraas ku fadhida iyo mid taagan. Waa saddex haween ah iyo labo rag ah. Shanta qof waxa ay dhegaysanayaan nin hadlaya. Ninku waxa uu xiranyahay dhar isku joog ah, oo lug keliya ayuu leeyahay, waxa uu adeegsanayaa ul. Wuu taaganyahay. Waxa ku xigta sabuurad ay ku sawiran yihiin labo xariiqo sawireed oo yar yar- gabar iyo wiil ku jira guri saqaf leh(tarniiq). Dhinaca kale ee sabuurada waxaa taagan haweenay gacanta wax ka tilaamaysa. Ninka iyo haweenaydu waxa ay u jeedaan oo la hadlayaan kooxda shanta qof ka kooban]

Buugaan waxaa laga heli karaa creative Common licence attribution. Wixii xog dheeraad ah, booqo: https://creativecommons.org/licenses/by-nc-sa/4.0/legalcode

# Tusmo

Erayo la soo gaabiyey........................................................................................ 4
Waa maxay buug gacmeedkan, yaase loogu talogalay?..................................... 5
1.Waa maxay guddiga dugsi loo wada dhan yahay (guddi)? .............................. 6
2. Habka raadraaca mataanaha.................................................................... 11
3. Sheekada Yuusuf ....................................................................................... 12
4. Sidee ayay guddiga dugsi loo wada dhan yahay u caawin karaan dugsi si uu u noqdo mid loo wada dhan yahay? ..................................................................... 20
5. Fahamka xirriirka/saaxiibtinimada awoodda............................................... 22
6. Wada shaqaynta guddiga dugsiga loo wada dhan yahay............................. 28
7. Doorka xirriiriyaha waxbarashada dugsi loo wada dhan yahay ................... 29
8. Fursadaha ku jira wadashaqaynta bulshooyinkeena ................................... 33
9. Ka soo bixida mushkiladaha iyo hanti yeelasha............................................ 37
10. Sida loo sameeyo khariiddada hantida bulshada....................................... 42

# Erayo la soo gaabiyey

| | |
|---|---|
| ADRA | Adventist Development Relief Agency |
| CBO | community-based organisation |
| DAF | Disability Aid Foundation |
| EENET | Enabling Education Network |
| NAD | Norwegian Association of Disabled |
| NGO | non-governmental organisation |
| OPD | Organisation of People with Disabilities |
| PDON | Puntland Disability Organizations Network |
| SEND | special educational needs and/or disability |
| SIT | school inclusion team/ Kooxda Ka wada qaybgalka dugsiga |
| SWD | Sarkaalka Waxbarashada Degmada |

# Waa maxay buug gacmeedkani yaase loogu talogalay?

Buug gacmeedkan waxa loogu talogalay ka qaybgalayaasha xirmada labaad ee ururada dadka naafada ah ee waxbarashada loo wada dhan yahay.


Ujeeddada xirmadan waa in la taageero ururada dadka naafada iyo xubnahooda iyadoo la tixgalinayo cidda ay u baahan yihiin inay wada shaqeeyaan iyo sida ay ula shaqaynayaan si bulshooyinkooda looga sameeyo dusgiyo loo wada dhan yahay. Tani waxa ka mid ah in la fiiriyo sida ururdada dadka naafada ula hawlgalaan una taageeraan dugsiyada si loo horumariyo loona maareeyo guddi dugsi loo wada dhan yahay (guddiga). Sidoo kale, waxa ka mid ah in la fiiriyo siday u aqoonsan lahaayeen khayraadka iyo awoodaha muhiimka ah ee bulshooyinkooda iyo inay kuwaasi wada shaqeeyaan si loo dhiso shabakad adag si loo taageero waxbarashada loo wada dhan yahay.

Tababarkani waa qayb ka mid ah hannaanka dhisidda awoodda ururada dadka naafada ee waxbarashada loo wada dhan yahay ee waqtiga dheer waxaana la horumarin/samayn doonaa tababaro dheeri ah oo kan lagu dul dhiso.

Waxbarashada loo wadadhan yahay kaliya **ma aha** in carruurta naafada ahi ay dugsiga tagaan/aadaan. Waxay ku saabsan tahay hubinta in arday **kasta** dugsiga **joogo**, uu ka **qayb qaadanayo** waxbarista iyo hawlqabadyada bulshada, iyo inuu ka **gungaaro** sida ugu wanaagsan ee awoodiisa ah.

# 1. Waa maxay guddiga dugsi loo wada dhan yahay (guddi)?

Guddiga dugsi loo wada dhanyahay wuxuu ka kooban yahay koox dad ah oo iskaa wax u qabso ku shaqaynaya, kuwaasoo daneeya waxbarshada ama dugsiga deegaankooda kuwaasoo wadaagga ujeeddo (hadaf) guud- inay ka dhigaan dugsigooda mid loo wada dhan yahay.




*Tusaale  kulanka guddiga oo ka dhacaya bannaanka dugsiga*

[Sharraxa sawirka: waxay yihiin sideed qof oo fadhiya bannaanka geed hoostiis si nus wareeg ah. Waxay ku fadhiyaan kuraas. Waxa ka dambeeya dugsi iyo xayn carruur ah oo ku ciyaaraya dugsiga bannaankiisa. Saddex dumar ah ayaa kooxda ka mid ah. Waxa jooga nin gaariga naafada ku fadhiya iyo nin waayeel ah oo usha socodka wata. Waxa kooxda ku jira qof tilmaan ku bixinaysa gacmaheeda. Qof dumar ah ayaa hadlaysa oo tilmaamo bixinaysa waxa agteeda taal usha naafada.]

# Wax ka barasho dhacdooyin – Maxay yihiin guddiyada dugsi loo wada dhan yahay?

**Akhri dhacdooyinkan wax ka barasho. Ma u malaynaysaa in dhacdo kasta ay sharxayso guddi dugsi loo wadadhan yahay? Maxay u tahay ama aysan u ahayn?**

**Dhacdada A**
Saddexdii bilood hal mar, saddex macallin ee dugsi yar oo ku yaal meel baadiye ah ayaa kulma si ay uga doodaan mushkiladaha ay ka wajahayaan waxbarista kooxda ardayda naafada ah ee soo gala dugsiga. Labada macallin ee kale ee dugsiga ma rabaan inay ku soo biiraan kulamadan, cidina kuma dhiirigelin inay sidaasi yeelaan.

**Dhacdada B**
Dugsi ballaaran, ayaa waxa la sameeyey guddi si ay u horumariyaan/sameeyaan qorshayaasha waxbarashada qof ahaaneed ee 30 arday oo loo aqoonsaday inay leeyihiin baahiyaha waxbarashada gaarka ah. Guddigu wuxuu ka kooban yahay khabiirka waxbarista, climi nafsi yaqaan, 2 macallin fasal, iyo 3 khabiir oo waxbarashada gaarka ah oo dugsiga ka baxsan.

**Dhacdada C**
Sanadkii hal mar, dugsiga C wuxuu u yeeraa waalidiinta/xanneenayayaasha inay ka soo qaybgalaan kulan. Kulankan, maamuluhu wuxuu u sharxaa waalidiinta/xannaaneeyayaasha waxyaabo ku saabsan siyaasada dugsiga ee ka wada qaybgalka waxbarashada, wuxuu weydiiyaa inay dhamaan ardaydu dugsiga yimaadaan, wuxuuna u sheegaa iyaga waxa ay macallimiinta iyo shaqaalaha takhasuska gaarka ah ay ka shaqaynayeen si ay u taageeraan ardayda loo aqoonsaday inay leeyihiin baahiyaha waxbarshada gaarka ah.

**Dhacdada D**
Dugsiga D wuxuu leeyahay arday aad isku dhex jirta, ooy ku jiraan arday baahiyaha waxbarashada gaarka ah iyo naafada iyo arday ka soo jeedaa saddex kooxood ee qawmiyado/luuqad kala duwan. Qayb ka mid ah macallimiinta, waalidiinta/xannaaneeyayaasha iyo mutakhasisiinta way kulmaan dhawrkii usbuuc ee kasta si ay uga dooddaan caqabadaha cusub ee soo kordhay ee ka wada qaybgalka, iyo inay hubiyaan horumarka laga sameeyey xallinta caqabadahaasi. Hadda waxay wadaan habkii lagu qori/shaqaalaysiin lahaa laba wakiil ee ardayga inay ku soo biiraan guddiga, si ay ugu biiriyaan waxyaabo ku saabsan aragtida ardayga iyo inay ka caawiyaan aqoonsiga ardayda deegaanka ee aan dugsiga iman.

**Qoraalka jawaabaha suurataglka ah, si loogu hago doodda guud**
**Wax ka barasho dhacdo A: Ma yahay guddi dugsi loo wada dhan yahay?**

- Haa… sababtoo ah ma jiro qaaciddo go'an ee xubinimada guddiga ama sida ay aalaaba u kulmaan, markaasi dhib ma leh, ka soo qaad, guddigu inaanu lahayn shaqaale xirfadlayaal ah (laga yaabee inaanu dugsigu lahayn khabiir waxbarasho ama cilmi nafsi yaqaan) ama khabiir ka baxsan, ama ay sanadka ay afar goor uun kulmaan sanadka.
- Maya… sababtoo ah guddigu wuxuu u muuqdaa inuu xoogga saarayo arrimaha naafada uun- iyo gaar ahaan arrimaha ardayda marka loo fiiriyo arrimaha guud, ma ahan kala duwanaansho weyn ee caqabadaha ka wadaqaybgalka (tusaale, meelaha miyiga waxa jiri kara arrimo la xirriira faqri xad dhaaf ah, gaadiid dugsi loo raaco, iwm).
- Maya… sababtoo ah dadaal lama galin in la hawlgaliyo macallimiinta kale iyo dabcan inaan waxba la samayn si kor loogu qaado wacyigooda waxbarasho loo wada dhan yahay.

**Wax ka barasho dhacdo B**: **Ma yahay guddi dugsi loo wada dhan yahay?**

- Maya… sababtoo ah ujeeddada guddigu waa mid aad u dhuuban/kooban. Waxay uun horimarinaysaa qorshayaasha waxbarashada loo wada dhan yahay ee ardeyda baahiyaha gaarka qaba. Uma muuqato inay u adeegayso arrimaha ballaaran ee ka wadaqaybgalka ee ardaydan caqabado kale ka wajahaya/haystaan waxbarashada.
- Maya… sababtoo ah xubnuhu guud ahaan waa xirfadlayaal, ma ahan, macallimiin loo wada dhan yahay iyo daneeyayaasha kale ee caadiga ah.

**Wax ka barasho dhacdo C: Ma yahay guddi dugsi loo wadadhan yahay?**

- Maya… sababtoo ah in kastoo ay waalidiinta/xannaaneeyayaal ku jiraan, ma aha mid laga wada qayb qaato. Waalidiinta/xannaneeyayaasha waxaa uun loo sheegaa waxa dhacaya, lagumase casuumo inay si firfircoon uga qaybqaataan hawlaha dugsi loo wada dhan yahay (aqoonsiga mushkiladaha iyo xallintooda).


**Wax ka barasho dhacdo D: Ma yahay guddi dugsi loo wadadhan yahay?**

- Haa… sababtoo ah waxaa si firfircoon ugu jira daneeyayaal kala duwan, waxaana wax looga qabtaa arrimaha ka wada qaybgalka oo kala duwan

# Soo koobid waxa uu yahay guddiga dugsi loo wadadhan yahay


## Guddiga dugsi loo wadadhan yahay:

- Wuxuu isku keenaa dadka dan/saamiga ku leh waxbarashada ama dugsiga deegaankooda kuwaasoo **wadaagga ujeeddo guud**- si ay uga dhigaan dugsigooda mid loo wada dhan yahay;
- Wuxuu leeyahay kala duwanaansho iyo xubinimo wakiil oo **mutadhawac/iskood wax u qabsadayaal ah;**
- **Waxa ku jiri kara xirfadlayaal aan kuwo waxbarasho ahayn** iyo sidoo kale shaqaale iyo macallimiin, sida kuwa dhismaha, kuwa ka shaqeeya caafimaadka, xubno ururka dadka naafada iwm
- **Wuxuu u jiraa inuu caawiyo**, shaqaalaha kale, ardayda iyo waalidiinta/xannaaneeyayaasha- ma aha inuu ku darayo/abuurayo lakab kale maamul jiitama ama culays. Haddii guddigu uu culays noqdo ama u shaqeeyo habdhaqan maamul jiitama, uma shaqaynayo sidii loogu talagalay;
- Wuxuu tusaale u yahay waxa uu ka wada qaybgal yahay xaqiiqo ahaan, **wuxuuna bixiyaa caawimaad iyo talo wax ku ool ah** si markaasi kuwa kale u bedelaan fikrada aragtida ku salaysan ee ay ka qabaan ka wada qaybgalka xaqiiqadana u gartaan;
- Waxay la macaamilaan **arrimaha ka wadaqaybgalka dugsiga oo dhan** ee soo bixi kara/kordhi kara xilliyada kala duwan ee waxbarasho sanadeedka-tusaale ahaan, sababaha iyo xalalka la xirriira cayda/maagista, maqnaanshaha ama daahitaanka kuwaasoo xannibaad ku ah ka wada qaybgalka dugsiga.




Khariidad maskaxeed ay sameeyeen ka qaybgalayaasha Saambiya

[Sharraxaada sawirka: khariidad maskaxeed, goobada bartanka waxa ku jira kalmada guddi dugsi loo wada dhan yahay. Waxa jira 3 'goobo-hadal muujiye' oo ay ku jiraan firkado ku saabsan 'waxa guddigu qabto'; 3 sharxaya 'caqabadaha'; iyo 3 sharxaya 'xalalka'. Goobo kasta waxa goobada bartanka ku xirta fallaar.]




Jaantus guddi dugsi loo wadadhan yahay oo ay sameeyeen ka qaybgalayaasha Saambiya

[Sharraxaada sawirka: sawirku waxa uu tusayaa sawirka baaskiil hoosta cinwaanka 'guddi dugsi loo wadadhan yahay-baaskiil'. Qaybaha kala duwan ee baaskiilka ooy ku jiraan lugaha, kooraha (saddle), biraha wadida (handlebars) iwm waxa lagu calaamadiyey waxyaabo sida 'carruur', hogaamiyayaasha madaniga', 'bulshada (waaliddinta), wasaaradda waxbarashada/caafimaadka, bulshada ganacsatada']

# 2. Habka raadraaca mataanaha

Ka wadaqaybglka waxbarashadu wuxuu xoogga saarayaa wax ka bedelka habka guud, ee ma saarayo wax ka bedelka ardayga. Laakiin xoog saarista heerka habka guud macaneheedu ma aha inaynu iska indho tirayno baahida wax barista **gaarka** ah ee ardayda **qof ahaantooda.** Waxaynu u baahanahay inaynu laba dhinac wax uga qabano takoorka waxbarashada – dhiirigalinta wax ka bedelka habka guud **iyo** in taageero gaar ah la siiyo baahiyaha waxbarista ee ardayga qof ahaan.

**Tan ayaa ah habka raadraaca mataanaha:**

**Xoog saarista nidaamka:**
Hubinta bii'ada wax barista iyo waxbarashada, ka jawaabista dabeecadaha iyo hababka ee kala duwanaanshaha iyo dhiirigalinta ka wada qaybgalka. Qaadista xannibaadaha.

**Xoog saarista ardayga:**
Xurmaynta aragtiyahooda iyo siinta taageero ku haboon waa xuquuqdooda. Tani waxay horseedaysaa awoodsiintooda iyadoo loo marayo joogitaan, ka qaybqaadasho iyo ka guul gaaris.

Ka wada qaybgalka waxbarashadu = ka jawaabista kala duwanaanshaha

Akhri sheekada Yuusuf ka dibna fiiri haddaad ka heli kartid tusaalayaal ku saabsan:

- Faragalin/hawlgallo xoogga saaraya **wax ka bedelka nidaamka**, ama in wax ka bedel lagu sameeyo dugsiga oo dhan ama fasalka oo dhan
- Faragelin/hawlgallo xoogga saaraya **taageerosiinta qof ahaaneed** ee hal cunug ama dhawr cunug oo gaar ah.

# 3. Sheekada Yuusuf

Yuusuf wuxuu ku dhashay indho la'aan. Iminka wuxuu arki karaa wax yar oo iftiin ah, wax kalese ma arko. Si kastaba ha ahaatee, aad ayuu u firfircoon yahay. Walaalihiis ayay wada cayaaraan iyo deriska wuxuuna baranayay si uu hooyadiis iyo aabbihiis uga caawiyo hawlaha yar yar ee guriga. Wuxuu jiraa afar sano waalidiintiisu waxay rabaan inuu dugsiga la bilaabo carruurta ay isku da'da yihiin, marka uu lix jir yahay. Waxay og yihiin (waalidiinta) inay u baahan yihiin inay horey usii qorsheeyaan maadaama aanay sahlanayn.



[Sharraxaada sawirka: waxaa jooga saddex carruur ah oo fadhiya dhulka qolka fadhiga. Gadaashooda waxa yaal kursi fadhi iyo dhawr sawir oo darbiga ku dhegan. Hortooda waxa yaal laba digsi oo la afganbiyey. Wiilka dhanka bidix ee xiran funaanada jaallaha ah waxa uu hayaa dhalo caag ah oo ay dhagxaan yar yari ku jiraan wuuna ruxayaa. Agtiisa waxa yaal ul cad oo dhulka taal. Wiilka dhexda waxa uu digsiyada ku garaacayaa malqacado loox ka samaysan (fandhaallo). Gabadha dhanka midigta way sacabinaysaa. Dhamaantooda way qoslayaan waxayna u eg yihiin inay madadaaloonayaan.]

Dugsiga hoose ee deegaanka ma danaynayo inuu qoro/qabto Yuusuf. Waxay ku fekerayaan inuu aado dugsi gaar ah. Laakiin dugsiga gaarka ah ee ugu dhow wuxuu u jiraa 240 km, wuxuuna qaadan karaa dhawr arday oo cusub sanadkiiba. Safarku aad ayuu u dheer yahay waana qaali taasoo Yuusuf uu qoyskiisa arki doono laba jeer kaliya sanadkiiba. Yuusuf aad ayuu u niyad jabay markuu arrinkan maqlay wuxuuna isyiri inaanu rabin inuusan sinaba u aadayn

dugsi gaar ah. Waalidiintiisa waxay isku raaceen inay muhiim u tahay Yuusuf inuu carruurnimadiisa la joogo qoyskiisa iyo saaxiibadiis, markaasi waxay isku dayayaan inay ogolaansho uga helaan Yuusuf in laga qoro dugsiga xaafadda.

Dusgigu wuxuu yiri waxaa jira sababo badan oon Yuusuf loo qori Karin. Tusaale ahaan:

- Dugsigu malaha macallin takhasus u leh carruurta indhaha la'.
- Macallimiinta kale khibrad uma laha wada shaqaynta cunug indho la'. Way ka cabsanayaan.
- Maamuluhu wuxuu ka werwerayaa/walaacsanyahay in carruurta kale Yuusuf caayaan/maagaan.
- Sarkaalka waxbarashada deegaanka wuxuu yiri waa siyaasadda dawladda in carruurta indhaha la' ay aadaan dugsiyada gaarka ah.
- Maamuluhu wuxuu yiri dugsigu miisaaniyad uma hayo uu ku soo gado buugaagta farta indhoolayaaasha ama qalabka qoraalka.
- Macallimiinta waxay ka fekerayaan in socodka iyo godadka dugsigu aad ugu khatar badan yihiin cunug indho la.'




[Sharraxaada sawirka: laba haween ah ayaa taagan oo wadahadlaya, tilmaamana ku bixinaya gacmahooda. Gadaashooda waxa ah dhismayaal iyo calaamad oranaysa 'dugsi'. Haweenayda dhanka bidixda, hore ayay waxoogaa u soo foorartaa iyadoo labadeeda gacmood fidinaysa una muuqata mid murugaysan. Dhinaceeda waxa jooga wiil yar oo ku labisan dharka dugsiga xiranna ookiyaalo madow ul dheerna haysta. Haweenayda ay la hadlaysaa si fiican ayay u labisan tahay toos ayayna u taagan tahay, hal gacan waxay u

saaran tahay sinteeda. Waxay u muuqataa mid caraysan ama adadag markay u jawaabayso haweenayda hore.]

Waalidiinta Yuusuf waxa ka tan badiyey taxa/liiska dheer ee sababaya inaanu wiilkoodu aadi karin dugsiga deegaankiisa. Waxay ku fekereen/tallameen inay u diyaariyaan inuu aado dugsiga gaarka- taasi oo noqon karto fursada kaliya ee uu wax ku baran karo.

Maalin ayaa Yuusuf hooyadiis oo qudaar ku gadaysay suuqa waxa u yimid macmiil cusub si ay uga gadato waxoogaa yaanyo ah. Waxay ahayd indhoole, Yuusuf hooyadiis waxay dareentay sida degdega iyo saxnimada leh ee ay lacagta u tirinaysay iyadoon arkayn lacagta. “waxaan rajaynayaa in maalin uu cunugaygu lacagta u tirin doono sidaadoo kale” Yuusuf hooyadiis ayaa tiri. Tani waxay bilowday wada sheekaysi. Haweenayda indhaha la’, Maano, waxay xubin ka ahayd urur dadka naafada ah waxayna u sheegtay inay Yuusuf waalidiintiis siin karto wax uun talo ah. Waxay ku ballameen inay maalinta xigta kulmaan.



[Sharraxaada sawirka: Waxa ah/jooga laba haween ah oo iska soo horjeeda oo isla hadlaya. Dhexdooda waxa dhulka lagu soo bandhigay noocyo kala duwan oo qudaar iyo miro ah. Haweenayda dhanka bidix waxay ku labisan tahay labis fiican oo dheer waxayna wadataa ul cad oo dheer. Haweeneyda dhanka midigta ayay wax u dhiibaysaa taasoo soo tiigsanaysa si ay uga qaadato.]

**Laba sano ka dib Yuusuf wuxuu galay dugsiga deegaankiisa. Side ayay tani ku dhacday?**

Maano ugu horrayn waxay ka taageertay/caawisay waalidiinta Yuusuf inay la kulmaan sarkaalka waxbarashada degmada (SWD). Wuxuu ahaa nin laga cabsado, waalidiinta Yuusufna wuxuu hore uga diiday 3 codsi si ay ula kulmaan. Maano waxay isticmaashay xirriirkeeda ururka dadka naafada ah waxayna ku adkaysatay kulan saacad qaatay. kulanka waxay la wadaagtay khibradeeda waxbarashada (tan gaarka iyo tan loo wadadhan yahay labada), waxayna u sharraxday waajibaadka caalamiga ah ee in waxbarashadu noqoto mid laga wada qaybgalo. Ugu danbayntii, SWD wuxuu ogolaaday/ku waafaqay in uu Yuusuf xaadiro dugsiga deegaankiisa, hadday Maano ka caawin karto dugsiga inuu ka gudbo taxa/liiska dheer ee mushkiladaha ah. Wuxuu kaloo ku waafaqay in laga doodo wax ka beddel lagu sameeyo siyaasadda kulanka soo socda ee wasaaradda ee uu ka qaybgalo.




[Sharraxaada sawirka: waxa jooga shan qof oo qol gudihii fadhiya. Dhanka midigta waxa fadhiya nin si fiican u labisan oo fadhiya miiska gadaalkiisa oo ay in waraaqo ahina saaran yihiin. Ninka wuu dhegaysanyaa. Waxa ka soo horjeeda afar qof oo kuraas ku fadhiya. Ninka waxa ugu soo xigta haweenaydii dharka fiican ee dheer xirnayd usha cad ee dheerna wadatay. Tilmaamo ayay bixinaysaa ninka ayayna wax u sharxaysaa. Waxa iyada ku xiga waa wiilkii funaanada jaallaha ah xirnaa oo ushiisa haysta iyo nin iyo haweeneydii qudaarta gadaysay. Waa wiilka waalidiintiis.]

Maano hawsheedii ku xigtay waxay ahayd inay ku dhiirigaliso macallimiintu inay booqdaan guriga Yuusuf ayna daawadaan isagoo cayaaraya iyo sida uu wax u qabanayo. Markay yimaadeen, macallin ayaa weydiiyey “ aaway wiilka aragga naafada ka ah”? waxay filayeen inay arkaan Yuusuf oo si degan isaga fadhiya, ee aan aagga orordayn oo kubbad cayaarayn! Khibradan ka dib macallimiintii dhamaan waxay isku waafaqeen Yuusuf inuusan waxtar la’aan ahayn siday filayeen, laakiin weli aad ayay uga cabsanayeen inay wax baraan.



[sharraxaada sawirka: isla saddexdii cunug ayaa dhulka fadhiya qolka fadhiga. Wiilka funaanada jaallaha ayaa iminka dhexda ku jira wuxuu digsiyada ku garaacayaa malqacado/fandhaalo loox ka samaysan. Gabadha iyo wiilku way eegayaan, way u sacbinayaan wayna dhiirigalinayaan. Gadaashooda waxa joogga nin iyo haweeney iyagoo daawanaya oo qoslaya.]

Maano iyo asxaabteeda ururka dadka naafada markaasi waxay dhawr bilood ka shaqaynayeen siday ku heli laahayeen urur macallimiinta tababar siin kara. Macallimiintu waxay heleen usbuuc tababar ah saddex goor inta lagu jiray fasaxyada kala duwan ee dugsiga. Tababarka waxa lagu baray arrimaha naafada iyo hababka waxbarista cunugu udub dhexaadka u yahay, waxaana fulinayay macallimiin aan naafo ah iyo kuwa aan naafo ahayn. Waxay tababarkoodii dhameeyeen lix bilood ka hor intaan Yuusuf dusiga la qorin/keenin. Markay ahayd waqtigii in Yuusuf dugsiga bilaabo, macallimiintii waxay Maano u sheegeen inay dareemayeen durba inay carruurtooda si wacan wax u barayeen, markaasi aad ayay iminka kalsooni ugu qabeen soo dhoweynta Yuusuf.



[Sharraxaada sawirka: waxaa jooga toddoba qof oo dad waaweyn ah oo isugu jira 3 haween ah iyo 4 rag ah oo fadhiya wareega miis weyn. Hal dumar ahi waxay ku fadhidaa gaari dadka naafafa ah. Nin iyo haweeney isla kuwaynu sawirkii hore ku soo aragnay ah ayaa sidoo kale miiska fadhiya/jooga. Qayb dadka ka mid ahi way isla hadlayaan. Hortooda waxa miiska saaran gaballo waraaqo ah oo wax ku qoran yihiin iyo qalimaan. Qolka dhabarkiisa, qof ayaa sabuuradda wax ku qoraya. Kalmadaha 'tababarka macallinka ee waxbarashada loo wada dhan yahay maalinta 2' ayaa sabuuradda halka ugu korraysa ku qoran.]

Markii Yuusuf la qoray/qaatay, macallinka fasalkiisa waxay wada shaqaynayeen Maano, Yuusuf iyo waalidiintiisa si ay u sameeyaan warqadda hiigsiga hore. Warqaddan waxa ku qornaa waxyaabaha ay tahay in Yuusuf marka ugu horeysa barto, sida macallinku u caawin lahaa, iyo waxay tahay taageero dheeri ah ee macallinku uga baahan karo asxaabta, Maano, waalidiinta iyo dadk kale.

Dhaqaale ahaan dugsiga suuragal uma ahayn in la qoro/shaqaaleeysiiyo macallin takhasus leh, Yuusuf waalidiintiisna waxay ka werwerayeen cidda awooda inay cunugooda xirfado barto sida qoraalka iyo akhriska farta indhoolayaasha. Baaritaano badan ka dib, Maano waxay xaafada xigta ka casuuntay laba qof oo yar yar oo indhoolayaal ah inay Yuusuf dusgiga ku soo booqdaan usbuucii laba jeer si ay u tusaan isaga macallinkiisa waxyaabaha aasaasiga ah ee qoraalka iyo akhriska farta indhoolayaasha. Kuwan yar yari waxay waxbarashada ka dhamaysteen dugsi gaar ah laakiin iminka waxay la halgamayaan siday shaqo u heli lahaayeen. Aad ayay ugu faraxsanaan lahaayeen inay ku taburaacaan haddii Yuusuf hooyadiis iyaga qado siin lahayd.

Mid ka mid ah labada tabaruce wuxuu xataa awoodi karay inuu ku qanciyo dugsigoodii hore ee gaarka ahaa inuu Yuusuf ugu deeqo looxa farta indhoolayaasha iyo qalin. Tabarucaha kale waxay aad ugu raaxaysanaysay khibrada caawinta Yuusuf taaso- caawimada ay ka heshay ururka dadka naafada- ay ku guulaysatay deeq waxbarasho si loogu soo tababaro macallinnimo, laga bilaabo sanadka danbe. Waxay rajaynaysaa inay tababarkeeda camaliga ah ku samayso dugsiga Yuusuf ayna maalin uun shaqo joogto ah ka hesho dugsiga.



[Sharraxaada sawirka: arday ayaa fasalka joogta. Miisaska ayay fadhiyaan waxayna u shaqaynayaan laba-laba. Miiska xagga hore dhanka bidix wiil aragga naafo ka ah ayaa isticmaalaya looxa farta indhoolayaasha iyo qalin. Waxa ku xiga nin dhallinyaro ah oo xaggiisa u soo foorara/qalooca oo dhiirigalinaya. Dhanka midigta haweeney dhallinyaro ah ayaa caawinaysa ardayga ku xiga. Gadaalkooda isla ninkii aan ku soo aragnay labadii sawir ee hore ayaa eegaya oo qoslaya.]

Macallimiintu waxay go’aansadeen inay u baahan yihiin inay diyaariyaan carruurta kale ee dugsiga si ay u soo dhoweeyaan Yuusuf, markaasi waxay abaabuleen hawlqabadyo kala duwan si carruurta loogu sheego naafanimada iyo xuquuqda carruurta. Carruurtii si deg deg ah ayay u fahmeen waxayna dhakhso u bilaabeen inay isweydiiyaan hadday samayn karaan waxyaabo kale si dugsiga looga dhigo mid amaan u ah marka Yuusuf la qoro. Waxay ku qaateen dhawr xilli qado inay guraan dhagxaanta si ay aagga cayaarta uga dhigaan mid siman oo bad qaba/amaan ah. Ka dib waxay dhagxaantii u isticmaaleen inay ku calaamadiyaan waddooyinka u dhexeeya ganjeelka, iyo

fasallada iyo maktabadda. Saddex ka mid ahi waxay ku heshiiyeen inay Yuusuf tusaan waddooyinka maalintiisa ugu horraysa. Qayb ka mid ah carruurta waxay aadeen guryihii waxayna la hadleen waalidiintood. Waxay rabeen in dadka waaweyn qudhoodu dugsiga  ka caawiyaan si looga sameeyo meel Yuusuf ka gali karo. Xilli galab ah dugsiga ka dib, 6 waalidiin ah ayaa yimid oo wata badeelo si ay gacan uga gaystaan buuxinta godadka. Yuusuf wuxuu gacan ka gaystay inuu qof walba biyo u keeno, maadaama ay ahayd shaqo harraad leh!





[Sharraxaada sawirka: waxa ah/jooga dad badan, rag, dumar iyo carruur oo ka wada shaqaynaya dhismaha dugsiga hortiisa. Nin ayaa wuxuu riixayaa gaari gacan ay ku jiraan dhagxaan waaweyn. Qayb ka mid ah dadka dhagxaanta ayay dhigayaan si ay u sameeyaan cirifyada waddooyinka dugsiga aada. Wiil gaari curyaan ku fadhiya ayaa u tilmaamaya Meesha dhagxaanta la dhigayo. Muuqaalka danbe haweeneyda labiska fiican ee dheer xiran waxay la hadlaysaa haweeney kale oo si fiican u labisan (maamulaha). Wiilka xiran funaanada jaallaha wuxuu dhinac soconayaa hooyadiisa taasoo wadda/sida sanduuq dhalooyin biyo ah.]

# 4. Sidee ayay guddiga dugsi loo wadadhan yahay u caawin karaan dugsi si uu u noqdo mid loo wadadhan yahay?

**Wada shaqayntu waa udub dhexaadka waxbarashada loo wada dhan yahay oo guulaysata.** Ka soo qaad, ururada aan dawliga ahayn ee caadiga ah waxa laga yaabaa inay khibrad badan u leeyihiin riixidda/dardargelinta isbedel lagu sameeyo habka/nidaamka guud sida wax ka bedelka siyaasadda, halka ururada gaarka ah ee naafada ay ku wanaagsanaan karaan inay wax ka qabtaan taageerada baahiyaha qof ahaaneed, sida siinta dayactir/dhaqancelin ama qalab. Laakiin hadday u shaqeeyaan keli-keli, urur kasta wuxuu qabanayaa xal qabyo/dhinac ah oo guul xadidan leh.

Waa maxay noocyada mushkiladaha haysta bulshadiina marka loo eego hubinta in ardayda oo dhami **xaadirto** dugsiga, **ka qaybqaataan** hannaanka waxbarashada, ayna u **gaaraan** sida ugu fiican ee ay awoodaan?

- Sidee wax looga qaban karaa xannibaadan/caqabadahan? Waa maxay tallaabo wax ku ool/dhaqangal ee la qaadi karo?
- Yaa loo baahan yahay inuu ka mid noqdo kala xulashada, horumarinta iyo fulinta xalka? Muxuu qof kastaa samaynayaa?
- Maxay wada -shaqayntu ku soo kordhin kartaa si xannibaadan/caqabadan loogu xalliyo hab wax ku ool ah marka loo barbar dhigo haddii qof kali ahi isku dayo inuu kaligiisa xalliyo?




Tusaale shax lagu lafagurayo xannibaad ee Saambiya

[Sharraxaada sawirka: gabal warqad weyn ayaa ku dhegan darbiga, waxa loo qaybiyey 5 dhidib oo leh ciwaanada ‘xannibaad,’ ‘sidee’ ‘kuma, ‘maxay’ iyo ‘ka qaybgalka guddiga’. Jawaabaha waxay ku hoos qoran yihiin ciwaan kasta.]

# 5. Fahamka xirriirka/saaxiibtinimada awoodda

Nolosha waxa jira ilo badan oo kala duwan ee awoodda ama qoddobo kuwaasoo dadka siiya awood, kuwaasoo aynu ashkaas ahaan u yeelano, ogaansho ama ogaansho la'aan, tusaale:

| | | |
|---|---|---|
| Aqoon<br>Xirfadaha dhegaysiga<br>Xirfadaha lafagurka | Khibrad shaqo<br>Booska kala sarraynta<br>Awoodda xallinta mushkilad | Darajada iyo hantida haysashada Khayraadka<br>Awoodda wax ka dhaadhicinta |

Sabuurad tusaysa dood ku saabsan cidda haysata awoodda dugsiga bulshada

[Sharraxaada sawirka: waxa ah warqad sabuuradeed taasi oo lagu sawiray kalmada 'awood badan' oo ku qoran bartanka. Waxa jira qoraal xusuuseedyo ku dhegan sabuuradda oo leh doorar kala duwan oo ku dul qoran qoraal xusuuseedyada sida 'hogaamiyayaasha diinta', bare jaamacadeed' 'sarkaal booliis' iwm kuwaasoo meelo kala duwan kaga dhegan gudaha iyo bannaanka goobada].

## Awood sidoo kale waxay noqon kartaa mid qof ama mid wadareed, sida qeexidda soo socota tusayso

**"**Awood waa kartida lagu caddeeyo/sheego **ujeeddooyinka qofka** loogana dhaadhicin karo inta kale si loo gaaro ujeeddooyinkaas. Waa kartida aynu ku helno waxaynu rabno, ku haysano waxaynu helnay, uguna qaabayno habka aynu rabno inaan u qaabayno".

"**Heer wadareedka**, awood waa kartida laysugu xiro ilaha kala duwan ee awoodda shakhsiga si loo keeno isbedelkii la rabay kaas oo ay ka faa'iidaan dhamaan ee aanay ka faaiidin ashkaasta kaliya".

**Awood waxa loo kala saari karaa sida soo socota:**

**Awood xigsasho:** sida badan isku dayada lagu xigsanayo awoodda shakhsi waxay qabaan in awooddu tahay wax dhamaad leh-marka qof ama koox ay awood yeeshaan inta kale waxay yeelanayaan awood yar.

**Awood lahaansho/siin:** noocan awoodda wuxuu tixraacaa/tusaa awoodsiinta nooca qofka. Waxay u suuragalisaa qofka inuu u kontaroolo/xukumo ama u maareeyo xaaladda sida danteeda/dantiisu ku jirto

**Awood la wada leeyahay:** tani waxa ku jira awood wadareed waxaana la helaa marka koox isugu tagto inay wax ka qabtaan mushkiladahooda waxayna samaysaa tamar ka weyn midda ay sameeyaan qof qof kooxda ku jira

**Awood qof:** awoodda noocan ahi waxay degan tahay qofka waxayna u taagan tahay awood gudaha ah. Waxay ku salaysan tahay is-aqoonsi iyo is-tixgalin, taasoo ka dib u fidda tixgalinta inta kale iyo aqbalaada inta kale sida inay siman yihiin.

- ‘Awood xigsasho’ waa sida aynu badanaa u aragno awood
- Waxaynu badanaa u qaadanaa haddii qof/koox ay saaxiibtinimo leeyihiin inuu awood badan yahay, ka dib inta kale ee saaxiibtinimada waa inay noqdaan kuwa awood yar. Waxaynu u qaadanaa haddii kuwa awoodda a yari ay awood yeeshaan, markaasi kuwa awoodda badani waa lama huraan inay lumiyaan qayb ka mid ah awooddooda, maxaa yeelay waxa kaliya jira in awood ah oo xaddidan oo la wadaagayo!
- Tusaale ahaan, Guddiga Maamulka Dugsi, macallimiinta waxa loo fahmi karaa inay ka awood badan yihiin xubnaha bulshada iyo waalidiinta. Macallimiintu waxay ka werweri karaan ku wareejinta awoodda waalidiinta iyo xubnaha bulshada inay keeni karto inay lumiyaan qaybo ka mid awooddooda.
- Argatidan awoodda ee hal dhinac uu guulaysan karo oo kaliya haddii dhinaca kale lumiyo qaybo awoodiisa ka mid ah inakama caawinayso inaan gaarno kala duwanaansho iyo bulsho aan takoor layan.
- Si aan u gaarno ujeeddooyinkeena, waxaan u baahanahay inaan beddelo habka aynu (iyo kuwa kalaba) u garano/aragno awoodda. Tani macneheedu waxa weeye inaynu helo habab aynu ku fududayno hawlaheena siyaabo aad

ugu dhow ‘awood la wada leeyahay’ iyo ‘awood lahaansho- iyo inaynu aad awoodda ugu fahamno in ay tahay khayraad aan dhamaan- qof kastaa in ku filan buu leeyahay/haysaa!



Tababar ka qaybgalayaal samaynaya door ka cayaar ‘wada shaqayn waxtar leh, Kambala, Yugaandha


[Sharraxaada sawirka: sawirku wuxuu tusayaa haweeney jilbaha ku haysa dhulka, haweeney kursi ku fadhida iyo nin gaari curyaan ku fadhiya hortooda. Waxa ku wareegsan kuraas kale. tilmaamo ayay jirkooda ku bixinayaan wayna isla hadlayaan.]

Wada shaqaynta sida qayb ka mid ah koox ama guddi aad ayay u adkaan kartaa illaa **qof kasta loo arko inuu la siman yahay** lana aqoonsado in **dhamaan** xubnuhu ay keenayaan awoodo kala duwan, aqoon iyo xirfado kuwaasoo **dhamaantood** caawin doona in la gaaro waxbarasho loo wada dhan yahay. Tani waa xaqiiqada ururada dadka naafada ah iyo ururada sidoo kale xaqiiq marka la samaynayo lana maaraynayo guddiga dugsi loo wada dhan yahay

Guddi dugsi loo wadadhan yahay wuxuu yeelan karaa xirriiriye laakiin qofkani **ma aha** mid ka awood badna qof kasta ee kale ee guddiga ka mid ah. Guddiga dugsi loo wada dhan yahay ma guulaysan karo haddii loo isticmaalo sida aalad ballaarinaysa awoodda shakhsiga ah ee qof.

# Wareega awoodda saaxiibtinimada

**Sawirka 1: Awood xigsasho**
Sawirkani wuxuu tusayaa haweeney si fiican u labisan, waxay u badan tahay inay tahay maamulaha una muuqataa in ay diidayso in cunug aragga naafo ka ahi dugsiga soo galo.  Hooyadu waxay la hadlaysaa maamulaha, waxay u eg tahay inay baryayso/weydiisanayso in cunugeeda loo ogolaado dugsiga, hase yeeshee xaaaladdan waxay dareemaysaa in aysan awood lahayn. Ujeeddadu waxay tahay maamuluhu waxay awood ka xigsanaysaa hooyada cunuga naafada ah. Maamuluhu waxa kaloo laga yaabaa in ay dareemayso awood la'aan hadday u malaynayso in dugsigeedu ku guuldaraysto inuu qaabilo cunuga.




[Sharraxaada sawirka: laba haween ah oo iska soo horjeeda ayaa taagan oo wadahadlaya, tilmaamana ku bixinaya gacmahooda. Gadaashooda waxa ah dhismayaal iyo calaamad oranaysa 'dugsi'. Haweenayda dhanka bidixda waxay ku labisan tahay dharka maalinlaha ah, hore ayay wax xoogaa u soo foorartaa iyadoo labadeeda gacmood fidinaysa una muuqata mid murugaysan. Waxa jooga wiil yar oo ku labisan dharka dugsiga xiranna ookiyaalo madow ul dheerna haysta. Haweenayda ay la hadlaysaa si fiican ayay u labisan tahay toos ayayna u taagan tahay, hal gacan waxay u saran tahay sinteeda. Waxay u muuqataa mid caraysan ama adadag markay u jawaabayso haweenayda hore.]

**Sawirka 2: Awood la wada leeyahay**
Sawirkani wuxuu tusayaa hooyadii cunuga aragga naafada ka ahaa oo la kulmaysa guddiga dugsi loo wada dhan yahay si looga doodo xaaladda. Waxa dhagaysanaya xubnaha guddiga waxayna u badan tahay in ay dareemayso inay caawinayaan aysana keli ku ahayn mushkilada ay wajahayso. Cunugeedu sidoo kale kulanka ayuu joogaa. Ujeeddadu waxay tahay inay dareemayso inay awoodda la leedahay kooxda, awood wadareed in wax lagaga wada qabto mushkiladaha.



[Sharraxaada sawirka: waxaa jooga 9 qof oo u fadhiya si nus-wareeg ah oo ku fadhiya kuraas dhadheer qol gudihiisa, gadaalna ku leh saddex daaqadood. Daaqadaha waxaad ka sii arki kartaa dhismayaal u eg dhismayaal dusgi. Dadka waxa ku jira nin ku fadhiya gaari dadka naafada ah, nin waayeel ah oo wata usha socodka iyo gabar dharka dugsiga xiran oo lug ka go'an tahay wadatana usha dadka naafada, oo weheliyaan saddex dumar ah oo kale iyo nin. Isla haweenaydii ku labisnayd dharka maalinlaha ah ayaa sidoo kale kooxda la fadhida oo hadlaysa. Waxa ku xiga, oo kursiga dheer ku fadhiya waa wiilkii yaraa ee ookiyaalaha madow xirnaa ul dheerna watay. Kooxdu way dhagaysanayaan haweenayda waxaana wejiyadooda ka muuqda dareeno walaac leh oo dhab ah.]

**Sawirka 3: Awood qof leeyahay**
Sawirku wuxuu tusayaa hooyadii cunugga araga naafada ka ahaa oo taagan, kulana hadlaysa bannaanka dugsiga bulshada guud ee dugsiga. Waxaa jira dad badan oo fadhiya oo hadalkeeda dhagaysanaya. Cunugeedu iyada ayuu ku xigaa, isagoo nin gacanta haysta, waxay u badan tahay inuu aabihiis yahay. Joogitaanka aabuhu waxay tusaysaa inuu xaaskiisa taageerayo. Maamulaha dugsigu wuxuu la fadhiyaa dhagaystayaasha isagoo dhagaysanaya waxay islaantu ku tiraahdo sida dadka kale. Ujeeddadu waxay tahay hooyadu waxay dareemaysaa awood qof leeyahay, luuqada xubnaheeda jirkuna aad ayay uga duwan yihiin markii ugu horreysay ee ay iskeed ula kulantay maamulaha dugsiga, waxay u muuqataa in la awood siiyay ayna kalsooni qabto.




[Sharraxaada sawirka: waa koox ballaaran oo 20 ama 30 qof ah oo isugu yimid kuraasta, bannaanka dhismaha dugsiga. Haweeney ku labisan dharka maalinlaha ah ayaa taagan oo la hadlaysa kulanka. Dhinaceeda waxa taagan nin xiran shaar iyo surweel, gacantana haya wiilkii yaraa ee ku labisnaa dharka dugsiga oo haysta ul dheer. Dadka kuraasta fadhiya waxay dhamaantood si taxadar leh u dhagaysanayaan haweeneyda hadlaysa. Waxa ka mid ah, oo xagga hore fadhida, waa haweeneydii sida fiican u labisnayd, oo dhagaysanaysa. Waxay u muuqataa mid taageeraysa. Sidoo kale waxa joogga kuwa kale oo dad la garan karo ah sida ninka gaari naafada ah ku fahdiya, ninka waayeelka ah ee usha socodka wata, haweeneyda khamaarka wadata iyo gabadha lugta go’an.]

# 6. Wada shaqaynta guddiga dugsi loo wadadhan yahay

Waalidiinta iyo bulshadu badanaa waxbarashada kuma lug laha, waxaana laga yaabaa in aysan ku baraarugsanayn adeegyada laga helayo iyo caawimaada iyo aqoonta ay bixin/deeqi karaan.

Macalliniin badan iyo aqoonyahano waxay u shaqeeyaan keli-keli waxayna la halgamaan siday u gaari lahaayeen baahiyaha dhamaan ardayda ay wada shaqeeyaan. Waxaa si xad dhaaf ah uga go’an shaqadooda laakiin ma haystaan taageero, fursado iyo qalabkii ka caawin lahaa inay noqdaan macallimiin loo wadadhan yahay.


Si kooban, sida badan waxa jira **wadashaqayn la’aan** taasoo muhiim ah haddii dugsiyada iyo bulshadu la rabo inay noqdaan kuwo loo wadadhan yahay.

Xusuuso, xataa aadan si toos ah qayb uga ahayn guddi waxbarasho loo wadadhan yahay ka xubin ahaan **waxaad leedahay masuuliyad ka xubin ururka dadka naafada ahaan, waalid ama xubin bulsho si aad u taageerto una wada shaqaysaan guddiga** si dugsigaaga looga caawiyo inuu noqdo mid loo wadadhan yahay.

**Sidee ayuu ururka dadka naafada ugu dari karaa qiime/biirin karaa guddi dugsi loo wadadhan yahay?**

- Waa Maxay fursadaha jira si aad ula hawlgashid una taageerto guddiga dugsi loo wada dhan yahay ee degmadaada?
- Maxay yihiin xannibaadaha/caqabadaha gaarka ah haysta waxbarashada loo wadadhan yahay ee aad u malaynaysid in ururkaagu/bulshadaadu ka caawin karto si wax looga qabto?
- Sidee ururkaagu u taageeri karaa guddiga dugsi loo wadadhan yahay inuu sii waaro waqtiga mashruuca ka dib?

# 7. Doorka xirriiriyaha waxbarashada dugsi loo wadadhan yahay



Doorka xirriiriyaha dugsi waxbarashada loo wadadhan yahay waa door iskaa wax u qabso/tabaruc.

Xirriiriyaha dugsi waxbarashada loo wadadhan yahay waa inuu ku shaqeeyaa door xirriirin; tani macnaheedu waa abaabulidda iyo maaraynta kulamada ee maaha lahaanshaha masuuliyadda oo dhan ee, aqoonsiga, qiimaynta iyo siinta/bixinta waxbarashada loo wada dhan yahay.

Waa inay/inuu xubin ka yahay guddiga dugsi loo wadadhan yahay waana inay/inuu caawisaa/caawiyaa in la hubiyo fulinta dhaqamada ka wada qaybgalka, siyaasadaha iyo dhaqangalinta ee dugsiyada gudahooda.

Xirriiriyaha waxbarashada dugsi loo wadadhan yahay wuxuu isu keeni karaa dugsiyada, beelaha iyo bulshada ballaaran si loo qaado masuuliyadda iyo lahaanshaha hawlaha waxbarashada loo wadadhan yahay ayna ku faanaan wax ka beddelka dugsiyadooda.


Xirriiriyaha waxbarashada dugsi loo wadadhan yahay waa qof muhiim ah kaasoo hubiya in dhamaan ardaydu helaan fursado isku mid ah si wax u bartaan ayna ugaaraan awooddooda oo dhamaystiran. Waa isku xirka muhiimka ah ee u dhexeeya ardayda, qoysaska, bulshooyinka, dugsiyada iyo xirfadlayaasha kale kuwaasoo samayn doona shabakadda taageerada ee ka wada qaybgalka dugsiyada iyo bulshooyinka.

**Xirriiriyaha waxbarashada loo wadadhan yahay wuxuu ka shaqeeyaa heerar kala duwan**




## Hawlqabadyada xirriiriyaha waxbarashada dugsi loo wadadhan yahay ka qayb qaadan karo heerarka dugsi, bulsho iyo wasaarad

### Heer dugsi




- Inuu kor u qaado awooddooda iyo inuu baraarujiyo maamulka dugsiga, macallimiinta iyo shaqaalaha kale ee dugsiga;
- Inuu hubiyo in qorshaynta dugsigu tahay mid loo wadadhan yahay/laga wada qaybgalo;
- Inuu qiimeeyo sida dhismayaasha deegaanka loo adeegsan karo/loo geli karo;
- Ka talo bixiyo samaynta agabyo gaar ah;
- Tababarida istaratijayada (qorshaha fog) ka wada qaybgalka fasalka;
- Inuu kor u qaado wada shaqaynta ka dhaxaysa dugsiga iyo bulshada;
- Indha indheeyo/kormeero oo qiimeeyo ardayda qof ahaan;
- Inuu dood kooxeedyo u abaabulo macallimiinta iyo ardayda labadaba;
- Soo jeediyo/ku taliyo hawlqabadyada in dugsiga dhamaantiis noqdo habka ka wada qaybgalka

### Heer Bulsho



- Inuu wacyigalin u sameeyo bulshada;
- Inuu dhiso wada shaqayn ka dhaxaysa dugsiga iyo bulshada;
- Inuu booqdo guryaha ardayda gaarka ah markii loo baahdo;
- Inuu xaadiro kulamada deegaanka;
- Inuu gudbin ugu sameeyo adeegyada deegaanka laga heli karo-tusaale ahaan qiimaynta daawaynta istbitaalka;
- Inuu aqoonsado xirfadaha ama alaabta/agabka laga heli karo deegaanka ee loo isticmaali karo dugsiga-caawinta waxbarista, iwm;

- Inuu tababaro mutadawiciinta/taburucayaasha deegaanka si ay u aqoonsadaan ardayda aan dugsiga dhigan;
- Inuu u diyaariyo tababar waalidiinta/xannaaneeyayaasha markii loo baahdo.

## Heerka wasaaradda Waxabarashada iyo Cayaaraha/heer siyaasadeed

- Inuu xaadiro kulamada golaha deegaanka si uu u wacyigaliyo una weydiiyo deeqda/dhaqaalaha la heli karo;
- Inuu wacyi galin ka sameeyo warbaahinta- raadiyaha iyo joornaallada deegaanka;
- Inuu xaadiro kulamada qorshaynta si uu u hubiyo in dhamaan qorshayaashu yihiin kuwa loo wadadhan yahay;
- Inuu ka qaybgaliyo ururada maxalliga ah iyo ururada bulshada tababar kasta ee waxbarashada loo wadadhan yahay ee lagu qabanayo xarunta taageerada waxbarashada ama meeshii kale ee ku haboon.



# 8. Fursadaha ku jira wadashaqaynta bulshooyinkeena

In la sameeyo shabakad xooggan ee taageerada waxbarasho loo wadadhan yahay aad ayay muhiim ugu tahay dugsiyada iyo guddiyadooda. Ururada dadka naafada waxay leeyihiin door muhiim ah oo ay ka ciyaaraan dhisidda iyo joogtaynta shabakadahan. Si loo dhiso shabakado xooggan waxaynu u baahanahay inaynu FIIRINO nooca taageero ee ka jira bulshada dhexdeeda iyo inaan ka FEKERNO sidaynu ugu samayn/abuuri lahayn xirriir wadashaqayn oo xooggan ee waxbarasho loo wadadhan bulshada oo dhan.

Inkastoo ay aad muhiim ugu tahay in la fahmo xannibaadaha/caqabadaha waxbarashada loo wadadhan yahay ee ka jira bulshooyinkeena, sidoo kale waa muhiim in la aqoonsado waxyaabo badan oo togan (fiican) oo ka jira bulshooyinkeena kuwaasoo aynu isticmaali karno si aynu taageerno ka wada qaybgalka waxbarashada.

Waxyaabahan togan waxaynu u arki karnaa xoog/awood inaga caawin doona in aynu jabinno xannibaadahan iyo in aynu xoojino awoodda dugsiyada ee ka wada qaybgalka waxbarashada. Awoodahan waxaa loo tixgalin karaa awood/hanti ama wax bulshada qiimo u leh.

# Maxaynu aragnaa markaynu eegno/fiirino bulshadeena?

## Maxaad aragtaa, markaad fiiriso saddexda sawir ee saddexda bog ee soo socda?



[Sharraxaada sawirka: bartamaha sawirka waxa ku jira nin dhallinyara ah. Waxa ku xiga laba dameer isagoo kadalooba oo haya mid ka mid ah lugihiisa hore. Ninka dhallinyarada ah gadaalkiisa waxa ah dameer kale oo lagu xiray gaari dameer laba taayir leh. Fuusto buluug ah ayaa ku xiran/saaran gaari dameerka. Sidoo kale sawirka waxa ku jira haweeney taasoo ag maraysa gaari dameerka. Sawirka xaggiisa danbe waxa ku yaal dhisme qaybtiis muuqato . Ma cadda waxa dhismuhu yahay, laakiin mid darbiyadiisa ka mid ah waxa ku qoran, "waxaa maalgaliyay guddiga reer Yurub". Dhismaha hortiisa waxa yaal gaari cad oo ballaaraan. Aagga dhismaha ka horreeya halka ninka dhallinyada ahi kadaloobo haweeynayduna marayso/soconayso, waa meel qalalan oo ciid adag dhagxaan badana ku dhex jiraan. Sidoo kale qashin badan ayaa dhulka yaal, gaar ahaan dhalooyin caag ah iyo baakado]



[sharraxaada sawirka: sawirka waxa weeye qayb dhul ah ciidley ah dhagaxyo badan oo waaweyna leh. Muuqaalkiisa danbe waxa ku yaal dhisme weyn oo midab cawlan oo shub ah. Dhulka waxa ah xayn teendhooyin cad cad ah oo balballaaran. Bartamaha sawirka waxa ah teendhada ugu weyn. Doc-xirrada teendhadan waa kuwo furan waxaadna ka arki kartaa koox dad ah oo fadhiya teendhada gudaheeda oo hadlaya. Teendhada horteeda waxa joogga wiil yar oo oo baaskiil yar riixaya. Teendhada agagaarkeeda waxa ah baco cad cad oo badan oo meelaha yaal. Sidoo kale waxa yaal xarigga dhar dhaqa oo u dhexeeya laba teendho oo ay ku waran yihiin dhar la dhaqay.]




[Sharraxaada sawirka: sawirka waxa weeye cariish weyn oo dusha uu ka saaran yahay tarniig laysu geegeeyey. Cariishka waxa ku sawiran xayn sawiro ah. Bannaanka cariishka waxa fadhiya waa nin ku fadhiya sanduuq caag ah oo cad. Agtiisa waxa yaal jirigaan jaalle ah oo ballaaran oo biyaha lagu qaato. Waxa ku wareegsan qashin badan-xayn tuubbooyin caag ah, xayn baco cad cad ah oo dusha layska saarsaaray, xayn jirigaano maran ah iyo xumbo  caag ah oo aad u wasakhaysan oo u eg joodari gaboobay. Muuqaalka ka sii danbeeya cariishka waa xirmo qashin ah oo weyn. Waxa jira nin ku dul  taagan xirmada qashinka ah oo qashinka eegaya iyo nin kale oo ag taagan oo xirmada qashinka eegaya. Muuqaalka ka sii danbeeya waxa joogta cagaf cagaf ku xigta xirmada qashinka ah]

## Markaynu eegno sawirada, ma waxaynu arkaynaa waxyaabo taban oo kaliya mise waynu arki karnaa waxyaabo togan?

# 9. Ka soo bixida mushkiladaha iyo hanti yeelashada


In kastoo ay markasta muhiim tahay in la eego mushkiladaha ama waxa bulshooyinka ka qaldan lana fahmo sida ay kuwani xannibaado ugu noqon karaan waxbarashada loo wadadhan yahay, tusaale ahaan, faqriga, sidoo kale waa muhiim in laga fekero waxyaabaha bulshada dhexdeeda ah ee caawin kara in la jabiyo xannibaadahan lana xoojiyo awoodda dugsiyada ee waxbarashada loo wadadhan yahay.

Waxyaabahan togan waxaynu u arki karnaa awood ama waxyaabo bulshada qiimo u leh- kuwan waxaynu ugu yeeri karnaa **hanti.** Hantida bulshada dhexdeeda waxay caawin karaan in la jabiyo xannibaadaha ku gudban waxbarashada loo wadadhan yahay ama waxay saacidi karaan in isbedel la keeno.

Hantida bulshada dhexdeeda waxaynu u isticmaali karnaa in aynu ku taageerno guddiyada dugsi loo wadadhan yahay iyo in aynu ku caawino wacyigalinta waxbarashada loo wadadhan yahay.

Eeg **sawirka bulshada oo faahfaahsan** ee bogga xiga

- Maxay yihiin hantida aad ku arki kartid sawirka kuwaasoo guddiyada dugsiyada loo wadadhan yahay u noqon kara taageero ama agab/khayraad muhiim ah?
- Sidee hantidani u caawin karaan in wax laga qabto xannibaadaha waxbarashada loo wadadhan yahay ee ay soo aqoonsadeen kana doodeen maalintii hore?
- Sidee ayay hantidani taageero ama agab ugu noqon karaan guddiyada dugsiyada loo wadadhan yahay?


MASJID
SALDHIGGA BOOLISKA
DAWAARLAHA DAACAD
MAQAAXIDA ZEYTUUN
SUUQ

[**Sharraxaada sawirka:** sawirku wuxuu tusayaa goob bulsho. Dhinaca sare ee bidix ee muuqaalka danbe waa masjid yar bannaanka masjidkana waxa wada taagan koox dad ah oo hadlaya. Mid ka mid ah dadka waa Imaamka masjidka. Masjidku wuxuu ku yaalaa daadega buurta wax yar xaggiisa midig waxa weeye laba wiil oo yar yar oo iscayrsanaya. Wiilashan waxaa ku xiga waa laba neef geel ah oo uu hogaaminayo wiil kale oo yar. Daadegga buurta ee bartamaha sawirka ee fog waxa kaloo ah koox teendhooyin ah oo balbalaaran oo u eg xero qaxooti. Dhinaca midig ee xerada qaxootiga iyo geeska midig ee kore ee sawirka waa sawir daaqado badan leh iyo saacad ballaarani minnaaradda dhexda kaga taal. Bannaanka dhismahan waxa ah calaamad oranaysa “Jaamacad” calaamadda horteedana waxa jooga saddex qof. Laba qof oo yar yar ayaa hadlaya mid ayaana wuxuu sitaa boorsada dhabarka. Hortooda waxa socda nin dhismaha ka soo baxay oo fayl/gal sita.

Meel u yare dhow dhanka midig ee sawrika waxa jooga nin hoos taagan balbalo yar oo jiingad ka samaysan. Balbalada hoosteeda waxa ah toban sariirood oo loox ka samaysan oo laba saf u yaal. Balbalada dhinacyadeeda waxa ah laba riyood iyo laba cunug oo soconaya. Dhinaca balbalada sawirka bartamihiisa waxa ah dhisme shub ah. Dhismuhu wuxuu leeyahay calaamad ku dul qoran oo tusaysa inuu yahay saldhig booliis. Laba haween ah oo saraakiil booliis ah ayaa taagan bannaanka dhismaha oo wada hadlaya nin kale oo sarkaal booliis ah ayaa taagan bannaanka isagoo waardiyaynaya halka laga galo saldhiga booliiska. Waxaad kaloo arki kartaa nin kale oo sarkaal booliis ah oo saldhiga dhexdiisa taagan.

Saldhiga booliiska hortiisa waxa jooga nin u socda xagga dhisme kale. Dhismaha uu ku socdaa wuxuu leeyahay albaabo aad u furan/u ballaqan gudaha dukaankana waxaa sursuran dhar la gadayo. Qof ayaa dukaanka ku jira isagoo kor u haya gabal maro ah. Dukaanka gudihiisa waxaa kaloo ah nin fadhiya oo wax ku tolaya miis yar.

Dhinaca bidixda ee sawirka hortiisa tooska waxa ah cariish/balbalo loox ka samaysan oo saqafka jiidgad ah leh. Balbalada gudaheeda waxaa ah laba digsi oo dabka saaran. Bannaanka balbalada dad ayaa ku fadhiya laba miis oo yar yar. Miiska koowaad waxa ah nin waayeel ah iyo haweeney dhallinyaro oo hadlaya, iyadoo miis yar labadooda u dhexeeyo. Waxa iyaga ku xiga nin dhallinyaro ah oo kaligiis miis fadhiya isagoo saxan cunto ahi hortiisa yaal miiska dushiisa.

Sawirka xaggiisa soo hore waxaa ah bajaaj ay saaran yihiin wadaha/darawalka iyo qof rakaab ah.


Dhinaca hore ee sawirka ee midig waxa ah balbalo dheer oo saqaf jiinga ah leh. Balbalada horteeda waxaa ah koox dumar ah oo saxaarado yar yar ku fadhiya iyagoo ay hortooda taal qudaar saaran dhar dhulka la dul saaray.  Waxa jooga nin iyo haweeyney qudaar ka gadanaya gadayaasha. Saqafka hoostiisa, qof gade ah oo cunug wata ayaa fadhiya gade kalana wuxuu haystaa ilmo yar.]

# Maxay yihiin noocyada hantida ee jira?

Hanti waxay noqon kartaa **xirfad farsamo** (tusaale ahaan farayaamo)



[Sawirka 1: Balbalada hoosteeda waxa ah toban sariirood oo loox ka samaysan oo laba saf u yaal. Nin ayaa jooga balbalada hoosteeda wuxuuna ka shaqaynayaa mid ka ah sariiraha.]




Hanti waxay noqon kartaa **takhasus aqooneed** oo qof leeyahay (tusaale ahaan aqoonta bare jaamacad)

[Sawirka 2: Waa sawir daaqado badan leh iyo saacad ballaarani minnaradda dhexda kaga taal. Bannaanka dhismahan waxa ah calaamad oranaysa "Jaamacad" calaamadda horteedana waxa jooga saddex qof. Laba qof oo yar yar ayaa hadlaya mid ayaana wuxuu sitaa boorsada dhabarka. Hortooda waxa socda nin dhismaha ka soo baxay oo fayl/gal sita.]

Hanti waxay noqon kartaa **urur** bulshada u shaqeeya (tusaale ahaan ururka haweenka)




[Sawirka 3: Waa koox haween ah oo nus-wareeg kuraas ugu fadhiya. Way wadahadlayaan.]

Hanti waxay noqon kartaa wax uun danayn ah ama dareen weyn oo qof bulshada ka mid ahi leeyahay (tusaale ahaan, kooxda kubbada cagta ee deegaanka)

Hanti waxay noqon kartaa **agab/kheyraad muuqda** oo bulshada dhexdeeda (tusaale ahaan, Meesha wax lagu cuno ee dadku ku kulmi karaan)




[Sawirka 4: Waxa ah cariish/balbalo loox ka samaysan oo saqafka jiidgad ah leh. Mid ka ah albaabada cariishka/balbalada ayaa furan gudahana waxaa ah digsi dabka saaran. Bannaanka cariishka/balbalada dad ayaa ku fadhiya laba miis oo yar yar. Hal miis waxa ah nin waayeel ah iyo haweeney. Waxa iyaga ku xiga nin dhallinyaro ah oo kaligiis miis fadhiya isagoo saxan cunto ahi hortiisa yaal.  Ninka dhallinyarada ah waxa ka danbeeya kirli dab saaran.]




Hanti waxay noqon kartaa **qof saamayn** ku leh bulshada dhexdeeda, sida Imaam.

[Sawirka 5: Waxa ah masjid. Bannaanka masjidka waxa ah saddex nin oo taagan oo wadahadlaya. Mid ka mid ahi wuxuu wataa usha curyaanka. Mid ka mid ah dadka waa Imaamka masjidka]

In kastoo in badan oo hantida ahi ay inoo cad yihiin, marmarka qaarkood ma aha kuwo aad u cad, waxa aynu u baahannahay in aynu si hal abuurnimo leh uga fekerno sida qof ama shay uu u noqon karo hanti waxtar ah

# 10. Sida loo sameeyo khariiddada hantida bulshada

- Khariiddada hantida bulshadu waxay la mid tahay khariidad masxkaxeedka bulshada
- Waxay tustaa DADKA, AGABKA/KHEYRAADKA iyo URURRADA noqon kara hanti waxtar ah iyo waxa uu yahay taageerada ay awoodaan inay ku deeqaan/bixiyaan
- Waxay kaloo tustaa sida hantida laysugu xiri karo si ay u sameeyaan shabakad taageeri karta guddiyada dugsi loo wadadhan yahay iyo in ay xoojiyaan taageerada bulshada ee ka wada qaybgalka waxbarashada
- Laga fekero tusaalayaal dad gaar ah ee bulshadaada/degmadaada, agab muuqda iyo ururo kuwaasoo hanti noqon kara
- Laga doodo siday u taageeri karaan guddiyada dugsi loo wadadhan yahay iyo ayna wax ugu biirin karaan horumarinta ka wada qaybgalka waxbarashada
- Si la mid ah sidaad u samayseen khariidad maskaxeedkiina, ka dooda sidaad ugu soo bandhigi lahaydeen hantida bulshadiina khariidad ahaan
- Sawira khariiddadiina (fiiri tusaalaha khariiddada hantida bulsho ee bogga soo socda)

Xayn tusaalayaal noocyada hantida aynu ka heli karno bulshada

**Dad**


- Qof aqoon u leh wax waxtar leh
- qof leh xirfad  aynu isticmaali karno
- Qof leh khibrad/o caawin noqon kara
- Qof  ku tabaruci kara waqti
- qof door hogaamineed cayaari kara bulshada dhexdeeda  loona isticmaali karo doorkiisa in lagu taageero ka wada qaybgalka waxbarashada

**Agab muuqda**

- Meel aynu u isticmaali karno kulamada
- Adeeg dawladeed kaasoo guddigu u baahan karaan in lagu caawiyo
- Masjid kaasoo isu keeni kara xubnaha bulshada
- Noocyada kala duwan ee gaadiidka dadweynaha
- Dukaamo kuwaasoo bixin kara agabyada dugsiga

**Ururrada**

- Urur ku deeqa/bixiya adeeg ay guddigu isticmaali karaan
- Urur saacidi kara si loo gaaro bulsho gaar ah
- urur saacidi kara wacyigalinta ama qaybinta xogta/warbixinta



People
Mr.P the retired teacher
(helps to speak to Parents)
Mr. K the tailor
The Imam at the Mosque
Mr.C the Eating Place Owner
(meetings)
Physical Resources
Dugsi/Madrasa
Vegetable Market
(Plants for School)
Jaamacad
tuk tuk drivers
(transport)
Land
River
Organisations
Association of tuk tuk drivers
Local women's Organisation
Youth Group
(helps with distributing pamphlets)

[Sharraxaadda sawirka: bartanka gabal warqad ah waxa ah saddex sawir gacmeed oo goobooyin ah oo saddex xagal loo habeeyey. Goobada u horraysa ee dhinaca bidix wax ku qoran kalmadda “dad”. Tan ku xigta waxa ku qoran kalmadda “urur” goobada saddexaadna waxa ku qoran “agab muuqda”. Saddexda goobo waxa midba tan kale ku  xira xarriiqo madow.

Aagga goobada “dad” waxa ah afar goobo oo yar yar oo dhamaantood uu ku xiro xariiq madow. Mid ka mid ah goobooyinkan yar yar waa nin waayeel ah oo bakoorad wata oo ay hoosta kaga qoran tahay Mudane Jaamac macallin hawlgab ah waxaana kalamadahan hoostooda ku sii qoran laba qaanso dhexdood “wuxuu ka caawiyaa si uu ula hadlo waalidiinta”. Goobo kale oo yar waxay leedahay sawir nin dhallinyaro ah oo isticmaalaya dawaar hoosta ay kaga qoran tahay “Mudane Geedi dawaarle”. Goobo kale oo yar waxa ku jira sawir masjid iyo kalamadaha “Iimaamka masjidka”. Goobo kale oo yar oo ku xiran goobada dad waxa ah sawir cariish leh saqaf tarniig ah. Bannaanka cariishka waxa fadhiya kooxdad ah oo miisas ku wareegsan. Laba ayaa wadahadlaya nin kale oo cuntaynaya wuu fadhiyaa. Wax ka danbeeya kirli burjike saaran.


Aagga goobada “urur” waxa ah saddex goobo oo yar yar oo iyada uu ku xiro xariiq madow. Goobada yare ee ugu horraysa waxay leedahay sawir wade/darawal bajaaj oo ay ku hoos qoran tahay “ururka wadayaasha bajaajta”. Goobada yare ee ku xigta waxa ku dhex jira sawir koox haween ah oo fadhiya oo hadlaya/sheekaysanaya. Waxa hoosta kaga qoran “ururka haweenka ee deegaanka”. Goobada yar ee saddexaad waxa ku qoran “kooxda dhallinyarada” hoosteeda laba qaanso dhexdood waxa ku qoran “waxay ka caawiyaan qaybinta waraaqaha macluumaadka (pamphlets)”.

Aagga goobada agabka muuqda waxa ku yaallix goobo oo yaryar oo uu iyada ku xiro xariiq madow. Tan u horraysa waa sawir dugsi oo leh kalmadda “dugsi/madarasa”. Goobada ku xigta waxay leedahay sawir haweeney qudaar iyo miro gadaysa hoosteedana waxa ku qoran “suuqa qudaarta” oo ay laba qoys dhexdood ku qoran tahay “beeraha dugsiga”. Goobada yar ee ku xigta waxay leedahay sawir dhisme daaqado badan iyo saacad weyn oo dhexda mannaarada ku taal leh. Bannaanka dhismahan waxa ah calaamad oranaysa “Jaamacad” calaamada horteedana waxa jooga saddex qof oo hadlaya/sheekaysanaya. Goobada yar ee ku xigta waxay leedahay sawir wade/darawal bajaaj qof rakaab ah wada. Sawirka waxa ku hoos qoran “wade/darawal bajaaj” oo leh kalmadda “gaadiid” ku jirta laba qaanso dhexdood. Waxa jira laba goobo oo kale oo yar yar oo ku xiran agabka muuqda-mid wuxuu leeyahay kalmadda “webi” iyo sawir webi midda kalana waxay leedahay kalmadda “dhul” oo gudaha kaga qoran]

## Joogtaynta shabakad xooggan ee hantida bulshada

Xusuusnow in aysan ku filnayn in la aqoonsado hantida ka jira bulshadeena oo kaliya. Waa in aynu sidoo kale **dhisnaa shabakad xooggan ee hantida** si loo taageero ka wada qaybgalka waxbarashada. Tan waynu samayn karnaa inagoo **xoojinayna wada shaqaynta** ka dhaxaysa guddiyada iyo hantida bulshada. Ururada dadka naafada waxay leeyihiin door muhiim oo ay ka cayaaraan dhismaha iyo joogtaynta shabakadahan.

Xusuusnow in saaxiibtinimada wada shaqayn xooggan ee bulshada guud ahaan ay muhiim u yihiin joogtaynta ka wada qaybgalka waxbarashada. Waxaa jira dhaqamo wanaagsan oo saacidi kara si loo dhiso wada shaqayn ama dhaqamo xun oo wiiqi kara. Waa inoo muhiim in aynu markasta ka fekerno oo aynu dib u milicsano in aynu isticmaalayno **dhaqamo wanaagsan si loo dhiso loona joogteeyo wada shaqaynta.**




[Sharraxaadda sawirka: waxa ah sabuurad oo xagga kore ku leh kalamadaha ‘khariidadaha hantida bulshada ee dugsiga hoose ee Drimari’. Sabuurada baratankeeda waxa ah saddex goobo oo ay ku qoran yihiin kalmadaha ‘dad’, ‘agabka muuqda’ iyo ‘urur’. Waxa jira xarriiqyo badan oo ka soo baxaya goobooyinka ku xiran googooyinka yar yar oo leh tusaalayaasha hantida, sawir iyo kalmado ah, sida; ‘dukaan’, webi’, ‘buur’ iwm.]